


# Xuquuqda dadka-hbtq oo Iswiidhan



Warqadaan warbixinta waxey ku socotaa adiga dhallinyaro oo ah dadka-hbtq iyo dhawaan imaaday Iswiidhan. Dadka-Hbtq waxaa laga wadaa qof khaniis, galmo la sameeye labada jinsi, ahaade labada jinsi iyo queerka. Warqadaan warbixinta adiga waxaad ka heleysaa warbixin ku saabsan adiga xuquuqyada aad leedahaya haddii aad tahay dadka-hbtq oo ku nool Iswiidhan. Bogga ugu dambeeyo adiga waxaad ka heli ururo, xafiiyo dawlad iyo ciwaano internet oo warbixin kale, caawinaad iyo kaalmo.

Sharciyada Iswiidhan waxey ku salisanyahay wada heshiinta caalamiga oo UN oo xuquuqda bina'aadamka. Waxaa loola jeedaa in dhammaan dadka isku qiimo leeyahiin iyo isku xuquuq leeyahiin. Ma bannaana in laguu hanjabo, lagu jir dilo ama si xun laguula dhaqmo sabab u tahay inaa tahay qof khaniis, galmo la sameeye labada jinsi, ahaade labada jinsi ama queerka.

## Codsasho magangelyo

Haddii adiga tahay qof wadankiisa hooyo lagu dhibaateynaayo oo taasna sabab u tahay inaa tahay dadka-hbtq adiga waxaad xaq u leedahay inaad magangelyo ka codsatit Iswiidhan arrintaas darteed. Aad bey muhiim u tahay in adiga sida ugu dhaqsaha badan intuu codsiga magangelyada bilaawga yahay sheektid sababta adiga u codsaneysid magangelyo iyo wixii kugu soo dhacay ama waxaa ka cabsaneysid iney kugu dhacaan wadankaa adiga ka imaatay. Magangelyo waxaa laga codsankara xuduudka wadanka ama xafiiska Hey'adda socdaalka. Haddii adiga magangelyo Iswiidhan ka codsaneysid oo sababtu tahay in adiga tahay dadka-hbtq oo la dhibaateeyo adiga waxaad la soo xiriirikartaa kooxda isku xiran oo la dhaho RFSL Newcomers sidaa u heshid caawinaad iyo kaalmeen oo arrinta magangelydoonida.

## Jeceelka iyo isla noolanshada

Adiga waxaad xaq u leedahay inaad jeclaankartid qofkaa dooneysid iyo noolaan kartid nolol qofka aad tahay. Haddii adiga la socotid qof aad isku jinsi tahiin adinka waxaad xaq u leedahiin in jeceelkiina sidaa dooneysiin u muujisiin. Haddii adiga aad 18 sano ka weeyntahay adiga waxaad guursan kartaa qofkaa dooneysid oo jinsi doonaayo ha ahaado. Iswiidhan waxaa ku nool dad badan oo ah dadka-hbtq oona ah waalid iyo adiga tusaale ahaan waxaad xaq u leedahay daryeelid uur qaadid ama kafaalo qaado carruur sida dadka kale camal.

## Galmo suubin

Intey dadka ka qeyb-qaadanaayaan ey doonaayaan iney isla suubiyaan galmo adiga qofkaa dooneysid baa galmo la suubinkartaa oo ha ahaada isku jinsi ama yuusan ahaan. Qof ka weeyn 15 sano lama suubinkaro galmo qof ka yar 15 sano. Waa sharciyan dambi. Laakiin sharcigu ma diidana in labo qof oo oo 15 sano ka yar galmo isla suubiyaan, haddii labadooda ey doonaayaan.

## Markaa adiga waxbarasho dhiganeysid

Markaa adiga joogtid dugsiga iyo jaamacada adiga waxaad xaq u leedahay inaa ahaatid qofkaa dooneysid iyo dareemikartid aamin. Qofna, ha ahaado macallin ama ardeykale ma u bannaana in si xun kuula dhaqmaan, is qaldan kuula hadlaan oo sababeyso adiga galmo jeceelkaada, adiga shaqsiyan jinsi ahaantaada ama jinsiga aad dooneysid inaad ahaatid ama si qaldan uga hadlaan dadka-hbtq.

## Marka aad shaqeyneysid

Isla sida iskoolka oo kale ayaad xaq ugu leedahay in aad ahaatid qofka aad tihid, aadna ammaan ku dareentid goobtaada shaqada, goobtaada tababarka shaqada iyo marka aad shaqo raadsaneysid. Ma jirto cid saaxibbadaada shaqada ka mid ah ama madax ah oo faallo xun ka bixin karta galmooshadaada, aqoonsigaaga jinsi ahaaneed ama cabbiriddaada xagga jinsiga, ama hadal xun ka sheegi karta dadka iyagoo isku jinsi ah isla galmooda, dadka jinsi walba la galmooda, dadka aan dhanna si gaar ah u raacsaneyn ama dadka diiddan in dadka la qolo-qoleeyo iyadoo taa lagu saleynayo cidda ay la golmoodaan.

## Haddii adiga daryeel isbitaal doonatid

Adiga galmo jeceelkaada, adiga shaqsiyan jinsi ahaantaada ama jinsiga aad dooneysid inaad ahaatid ma bannaana in saameyn ku yeeshaan daryeelka caafimaadka adiga heleysid ama sida ey shaqaalaha daryeelka caafimaadka kuula dhaqmaayaan. Adiga waa in si xushmad leh laguu la dhaqmo iyo dhibaatooyinkaada si micno leh loola dhaqma.

Dhammaan shaqaalaha daryeelka ka shaqeeyo waxaa qaban sharciga sirta. Taasna micnaheeda tahay ineysan qofkale warbixin ka siinkarin warbixin ku quseyso intaa ka eheen dadka ku shaqo leh iney adiga ku caawiyaan, oo laga wadaa shaqaalaha daryeelka isbitaalka oo adiga daryeelka caafimaadka ku siin. Ayaga wax warbixin ma siinkaran qoyskaada, ehelkaada ama saaxibadaa haddii adiga aadan dooneyn. Laakiin ayaga waxaa waajib ku ah iney ashkood u diraan guddiga ade-

ega bulshada haddii ey ka shakiyaan in qof 18 sano ka yar tusaale ahaan jir dil lagu suubiyo ama guriga lagu xoogo.

In la iska baaro xudurada laga qaado galmada (STI) iyo hiv/aids waa u yahiin bilaash dhammaan dadka ku nool Iswiidhan.

Adiga oo dhallinyarada ah waxaa jiro qeybta qaabilaada dhallinyarad. Meeshaas baa adiga tagikartaa haddii adiga dooneysid inaa weeydiisid su'aalo ku saabsan jirka, galmada iyo isla noolaanshada ama haddii adiga dareemeysid caafimaad daro iyo u baahantahay qof aad la hadashi. Qeybta qaabilaada dhallinyarada adiga waxaad tagikartaa laga bilaabo markaa jirtid 13 sano ilaa adiga ka noqoneysid 20 ama ilaa 25 sano. Bogga internetka **www.umo.se** waxaad adiga heleysaa warbixin meesha aad kala xiriireysid qeybta qaabilaada dhallinyarada oo adiga kuugu dhaw. Meeshaas waxaad xitaa ka heli warbixin ku saabsan jirka, galmo suubin iyo isla noolanshada iyo fursad aad su'aalaha aad dooneysid ku weeydiin kartid magac la'aan.

## Xagga dadka aan dhanna si gaar ah u raacsaneyn ee raba in ay beddelaan jirkooda iyo jinsigooda sharci ahaaneed

Haddii aad dooneysid in aad jirkaaga beddeshid si uu si fiican ugu waafaqyo aqoonsigaaga jinsi ahaaneed waxaad caawimaad in qalliin laguugu sameeyo iyo in hormoonno lagu siiyo ka heli kartaa hey'adaha caafimaadka. Waxaa khasab ah in aad marka hore martid baaritaan ku aaddan aqoonsiga jinsi ahaaneed. Wuxuu baaritaanku hor iyo horraan ku saabsanaanayaa in laga hadlo sida aad u aragtid aqoonsigaaga jinsi ahaaneed. Xaq baad u leedahay in aad baaritaan martid iyadoo aan la eegeyn halka aad Iswiidhan ka deggantihd. Si aad u imaan kartid rugta qaabilaadda ee sameynaysa baaritaannada aqoonsiga jinsi ahaaneed waxaa jira xeerar kala duduwan oo shaqeynaya oo ku xiran hadba meesha aad deggantihid. Meelo badan waxaad u baahantahay in uu ku gudbiyo cilmi-nafsiyahan guud ama cilmi-nafsiyahanka carruurta iyo dhallinyarada (BUP). Meelo kale waxaa ku gudbin kara rugta qaabilaadda dhallinyarada ama dhakhtarka qoyska. Meelaha qaarna isaga ayaa xitaa qofku isu gudbin kara, micnaha



adiga ayaa codsan kara adigoo foom buuxinaya. Waxaad u baahantahay in aad Iswiidhan ku diwaangashantahay si aad u billawdid baaritaanka aqoonisga jinsi ahaaneed laakin uma baahnid in aad haysatid dhalashada Iswiidhan. Waad billaabi kartaa baaritaanka aqoonsiga jinsi ahaaneed haddii aad ka yartihid 18 sano laakin daweynta qaarkeed iyo si loo beddelo aqoonsiga sharciga la xiriira waxaa khasab ah in aad 18 sano buuxisay. Xaq ayaad u leedahay daryeel xitaa haddii waaliddiintaadu aysan taas oggoleyn. Haddii aad horbaba daweyn ka billawday waddan kale oo aan Iswiidhan ahayn hey'adaha caafimaadka ee halkan waa ay ku caawinayaan.

Haddii aad rabtid in aad magaca hore beddelatid si aad tusaale ahaan u heshid magac kale oo waafaqsan jinsiga aad isu aragtid in aad tihid, taa waad sameyn kartaa adigoo aan wax baaritaan ah marin ama aadan la xiriirin hey'adaha caafimaadka. Si aad magac cusub ugu diiwaan gashatid waraaqahaaga aqoonsiga waxaad la xiriireysaa Skatteverket.

## Xafiiska adeega bulshada iyo guri

Xafiiska adeega bulshada waxaa laga helaa degmokasto dhammaan Iswiidhan. Xafiiska adeega bulshada marmar dadka wuu ka caawiyaa guri, shaqo iyo dhaqaalo. Sida marmarka kale camal adiga waxaad xaq u leedahay i si xushmad leh laguula dhaqmo markaa la xiriirka la leedahay xafiiska adeega bulshada. Ayaga ma u bannaana in adiga si xun kuula dhaqmaan, ama su'aalo ka qabaan, adiga galmo jeceelkaada, adiga shaqsiyan jinsi ahaantaada ama jinsiga aad dooneysid inaad ahaatid.

Haddii adiga ku nooshahay guri ey ku geeyeen xafiiska adeega bulshada ama Hey'adda socdaalka ayaga iyo shaqaalaha gurigaas waxey mas'uul ka yahiin in adiga wanaag dareemtid iyo aamin meesha aad ku nooshahay. Haddii adiga aadan dareemeyn aamin inaa ku tahay guriga aad ku nooshahay oo Hey'adda socdaalka ku geeyeen aad bey muhiim u tahay in adiga sida ugu dhaqsaha badan soo ogeysiisid Hey'adda kormeerida daryeelka caafimaadka iyo isbitaalada[Inspektionen för vård och omsorg] (IVO) sidey ayaga kuu caawinkaran adiga. Ayaga shaqadooda baa ah in ey hirgaliyaan in xafiiska adeega bulshada ku dhaqmaan sharciyada iyo xeerarka jiro iyo bixiyaan daryeel wanaagsan ilaa intii suurtagal ah.

## Internet iyo saxaafada bulshada [social media]

Interneka waxaa qaban xeerarka oo wadanka sidiisa kale quseeyo. Taasna micnaheeda tahay in qof sharraf ridid lagu suubinkarin, la dhibeynkarin, loo hanjabikarin ama dhibeyn arrimaha galmo suubinta laguu geeysankarin markaa internetka isticmaaleysid. Qofna ma u bannaana in wax xun kaa qoran adiga ama galmo jeceelkaada. Ayaga ma u bannaana xitaa iney wax xun kaa qoran oo adiga ku saabsan maadaama aad tahay qof jecel inuu ahaado labada jinsi. Qofna ma u bannaana iney kuu hanjabaan, kugu qasbaan inaa suubisid ficilo galmo ama diran sawiradaada adigoo dooneyn. Ayaga ma kuu soo diri karan xitaa sawiro haddii adiga aadan dooneyn. Haddii adiga lagug suubiyo waxyaabaas adiga waxaad la xiriiri oo ku dacwoon boliiska.

# Meelahaan baa adiga caawinaad ka heli

## Goobaha kulanka Hbtq-da

### Newcomers Youth

Newcomers Youth waa hawl ku wajahan dhallinyarada hbtqi-da ee waddanka ku cusub ama megengelyo dalbaday, una dhexeeya 15 iyo 25 sano. Waxay bixiyaan la talin sharciyada la xiriirta, goobo kulan oo aamin ah iyo workshop-yo hal abuurid leh. Newcomers Youth waxaa hawlwadeen ka ah ururka dhallinyarada RFSL Ungdom. Adigaaga ka weyn 25 sano waxaa jirta hawsha wax qabadka RFSL Newcomers oo ay RFSL hawl wadeen ka tahay. RFSL iyo RFSL ungdom labaduba waa ururro samafal oo hbtqi ah.

https://newcomersyouth.se

www.rfsl.se/en/medlem/asyl

### Transammans – urur loogu tala galay dadka aan dhanna gaar u raacsaneyn iyo qaraabada

Transammans waa urur qaran oo loogu tala galay dadka aan si gaar ah dhan u raacsaneyn iyo qaraabada. Iyaga badankoodu waxay ku firfircoonyihiin baraha bulshada laakin sidoo kale waxay meelo badan oo Iswiidhan ka mid ah ku leeyihiin meelo lagu kulmo iyo hawlo dhaqdhaqaaq.

www.transammans.se

# Talooyin iyo caawimaad ku aadan sidi wacnaan loo dareemi lahaa

## Hagaha daryeelka – ee su'aalaha ku aaddan daryeelka caafimaadka

Barta intarneetka ee 1177.se Hagaha daryeelka waxaa ku jira macluumaad leesu ururiyay oo ku aaddan daryeelka caafimaadka ee Iswiidhan. Halkaas waxaa ku yaalla sida uu daryeelka caafimaadku u shaqeeyo, xuquuqda aad leedihid kuwa ay yihiin iyo meesha aad dhibaatooyinka kala duduwan ula xiriireysid. Halkaas waxaa sidoo kale ku jira macluumaad ku aadan waxa aad sameyn kartid haddii aad dareemeysid in aadan helin daryeelki aad xaqa u lahayd ama hey'adaha caafimaadka si xun laguugula dhaqmay.

**www.1177.se/en/other-languages/1177-in-other-languages**

## Youmo.se

Youmo.se waa bog loogu tala galay adigaaga 13 ilaa 20 jirka ah. Halkan waxaa ku jira macluumaad ku saabsan jirka, galmada iyo caafimaadka. Waxaad sidoo kale ka akhrisan kartaa sinnaanta, xuquuqdaada iyo sida aad ku heli kartid caawimaad si aad wacnaan u dareentid. Youmo waxaad ka arki kartaa sawirro iyo filmaan, waxaadna ku akhrisan kartaa carabi, daari, soomaali, iswiidhish ama tigree. Waxaad sidoo kale ka heli kartaa macluumaadka xiriirka ee dhammaan rugaha qaabilaadda dhallinyarada ee Iswiidhan.

**www.youmo.se**

## Transformering.se

Bogga intarneetka ee transformering.se waxaad ka akhrisan kartaa wax dheeraad ah oo ku aaddan dadka aan dhanna gaar u raacsaneyn. Bogga waxaa gacanta ku haya ururrada RFSL iyo RFSL Ungdom. Halkaas waxaad ka heleysaa xeerarka shaqeynaya, waxaad ka heleysaa talooyin ku aaddan arrimaha taabanaya dadka aan dhanna gooni u raacsaneyn.

**www.transformering.se**

### Pegasus – waxaa loogu tala galay adigaaga galmada wax ku beddeshay

Haddii ay ku soo martay in aad galmo wax ku baddelatay oo aad waxyaabo taa iska weydiineysid waxaad la xiriireysaa Pegasus si aad macluumaad u heshid iyo taageero. In galmo wax lagu beddesho waxay ka dhigantahay in aad wax heshid iyadoo galmo lagaaga beddelanayo, tusaale ahaan lacag, daroogo, khamri, hoy iyo waxyaabo kale. Pegasus waa bog intarneet iyo qoraal kula sheekaysi oo uu hawl wadeen ka yahay ururka RFSL Ungdom, oo ah urur dhallinyaro oo ay leedahay RFSL. Pegasus waxaa loogu tala galay dadka hbtqi-ga ee ah 15–25 sano jir.

**www.pegasus.se**

### HIV-Iswiidhan

Hiv-Iswiidhan waa urur samafal oo ka shaqeeya in uu hagaajiyo duruufaha nololeed ee dadka la nool HIV-ga.

**www.hiv-sverige.se**

## Macluumaadka iyo taageerada hannaanka xagga megelyada

### Laanta socdaalka

Laanta socdaalku waa hey'ad dowladeed oo gacanta ku haysa codsiyada dadka doonaya in ay Iswiihan degaan, booqasho ku yimaadaan, badbaado ka raadsanaya dabagelid ama raba in ay dhalashada iswiidhish helaan. Halkan waxaad ka heleysaa macluumaad ku wajahan dadka hbtq-ga ee megelyada doonaya.

**www.migrationsverket.se/Privatpersoner/Skydd-och-asyl-i-Sverige/For-hbtq-personer.html**

### Guddiga qaranka ee kooxaha qaxootiga (FARR)

Farr waa urur loogu tala galay dadka iyo kooxaha ka shaqeeya xoojinta xaqa megengelyada.

**www.farr.se**



### Xarunta xaqa megengelyada

Xarunta xaqa megengelyadu waa urur samafal. Waxaad la xiriiri kartaa Xarunta xaqa megengelyada haddii aad su'aalo ka qabtid hannaanka megengelyada iyo kiiskaaga. Mararka qaarkood waxay xitaa awoodaan in ay wakiil ahaan kiiskaaga kuugu metelaan. Xarunta xaqa megengelyadu waxay badanaa la kulantaa dad u baahday in ay soo cararaan iyadoo ay sababtu tahay sida ay waddamadooda hooyo u arkaan dabcigooda xagga galmada, aqoonsigooda ama cabbiriddooda jinsiga ka gudubsan.

**https://sweref.org**

**https://sweref.org/hbtq-personer-i-asylprocessen**

## Haddii si xun laguula dhaqmay

### Booliska

Silcin, meel ka dhacyo galmada laxiriiira, handadaad iyo gacan qaad waa in sidoo kale booliska loo sheegaa maxaa yeelay waa dembi waxaasi. Haddii sabab la xiriirta galmooshadaada ama in aad tihid qof aan dhanna si gaar ah u raacsaneyn wax laguugu geysto waxaa taas loogu yeeraa dembi naceyb, wuxuuna keenaa ciqaab kuwa kale ka adag.

**www.polisen.se**

### Hey'adda adeegga bulshada

Haddii aad u baahantihid in aad ka tagtid qoyskaaga ama lammaanahaaga iyagoo ku handadaaya, ku dilaya ama si kale kuugula dhaqmaya si xun awgeed waxaad caawimaad leh hoy qarsoodi ah ka heli kartaa hey'adda adeeggan bulshada. Hey'adda adeegga bulshadu waa hey'ad hawlaheeda ay dowladdu kharash-gareyso. Macluumaadka xiriirka ee hey'adda adeegga bulshadu waxay ku jiraan bogga intarneetka ee degmada aad deggantihid. Waxaad macluumaadka xiriirka ka heli kartaa sidoo kale:

**www.kollpasoc.se**

## Wakiilka takooridda (DO)

Iskoolka, suuqa shaqada, hey'adaha caafimaadka iyo hey'adaha kale ee dowladda waa ka mamnuuc sida xeerka takooridda ku cad in laguu geysto silcin, meel ka dhacyo, handadaad iyo gacan qaad ay sabab u tahay galmooshadaada, aqoonsigaaga jinsi ahaaneed, cabbiraaddaada jinsi ahaaneed. DO waa hey'ad dowladeed oo hubineysa in la raaco xeerka takooridda. Haddii aad takoorid su'aalo ka qabtid waxaad la xiriireysaa wakiilka takooridda.

**www.do.se**

## Hey'adda kormeerta laamaha daryeelka iyo xannaanada (IVO)

Halkan ayaad la soo xiriiri kartaa haddii hey'adaha caafimaadka iyo hey'adda adeegga bulshadu ay si xun kuula dhaqmeen. IVO waa hey'ad dowladeed.

**www.ivo.se**

## Rugta qaabilaadda ee taageerada RFSL

Rugta qaabilaadda waxaa loogu tala galay adigaaga ah qof hbtqi ah ee loo geystay silcin, handadaad ama gacan qaad. Halkan ayaad la soo xiriiri kartaa si aad cid ula hadashid, una heshid taageero iyo caawimaad haddii lagu geystay handadaad, gacan qaad ama galmo laguugu khasbay. Xitaa xigtada iyo saaxibbada dadka hbtqi ee dhibka loo geystay wey la xiriiri karaan. Rugta qaabilaadda ee taageerada waxaa hawl wadeen ka ah ururka samafalka ee RFSL

**www.rfsl.se/en/organisation/stod/rfsl-stodmottagning**

## Heeganka gabdhaha- ama dhallinyarada

Haddii qoyskaaga ama lammaanahaagu ay si xun kuula dhaqmayaan iyadoo ay sababtu tahay galmooshadaada, aqoonsigaaga jinsi ahaaneed ama cabbiridda jinsigaaga waxaad caawimaad iyo taageero ka heli kartaa hey'adda adeegga bulshada iyo heeganka dhallinyarada. Heeganka dhallinyaradu wuxuu ka jiryaa meelo kala duduwan waddanka oo dhan, waxayna kaa caawin karaan la xiriiridda tusaale ahaan booliska, hey'adda adeeggan bulshada ama hey'adaha caafimaadka. Qaar waxay ku wajahanyihiin oo keliya in ay caawiyaan gabdhaha oo keliya, qaarna waxay aqoon gaar ah u leeyihiin dadka iyagoo isku jinsi ah isla galmooda, dadka jinsi walba la galmooda, dadka aan dhanna si gaar ah u raacsaneyn ama dadka diiddan in dadka la qolo-qoleeyo iyadoo taa lagu saleynayo cidda ay la golmoodaan. Unizon ayaa isu ururisa dhammaan heegannada oo kaa caawinaya in aad gaartid heeganka saxda ah.

**www.unizon.se**

## Urur shaqaale – taageero xagga suuqa shaqada

Haddii goobta shaqada si xun laguugula dhaqmay ama mar aad shaqo raadsatay waxaad taageero iyo caawimaad ka heli kartaa urur shaqaale. Ururka shaqaaluhu wuxuu u jiryaa si uu u caawiyo xubnihiisa si, si fiican suuqa shaqada loogula dhaqmo. Sidoo kale wey ku caawin karaan haddii aad rabtid in aad dhacdo ku dacweysid Wakiilka takooridda ama booliska.

**www.fackförbund.com**

# SOMALISKA

**Beställ eller ladda ner materialet på:**

www.mucf.se/publikationer

Text: MUCF och RFSL
Foto: White Box Studios
Grafisk form: Strawberry Lake
Tryck: Tryckservice i Ängelholm AB
Kontakt: Myndigheten för
ungdoms- och civilsamhällesfrågor
Box 206, 351 05 Växjö
Telefon: 010-160 10 00
www.mucf.se

© 2021 Myndigheten för
ungdoms- och civilsamhällesfrågor

RFSL Ungdom

RFSL

mucf Myndigheten för ungdoms- och civilsamhällesfrågor